DA'YARTA
&
DIINTA
Q.1aad

# MUXUU GALABSADAY WAKHTIGU ?

**W.Q.** SalaX Muxamad Xasan

14 / 02 /2021

**Mahadnaq**

- Allah Ayaa Mahadi Usugnaatay Mar Hore iyo Mardambaba Siguud iyo SiGaaraba Fursada Iisiiyay Inaan Qoro DHiganahan Yar Sidoo Kale Waxaan Allah Uga Mahad Celiyanaya Nimcooyinka kaluu Inagu Manaystay Ee Aan la Soo Koobi Karin .

  Waxaankaloon Ku Saliniyna Nabiga عليه الصلاة والسلام.
- Waxaan Kaloon Umahadnaqayaa Asxaabta Igu Caawisay Ama Igu Dhiirigalisay Inaan Qoro Dhiganahan Yar Waxaan Leeyahay Shukran

# HORDHAC

Allah Wuxu Ku Sheegay Quranka inuu Nasiiyay Oo Uu Inagu Manaystay Nimcooyin Badan Allah Wuxuu Yiri

وإن تعدوا نعمة الله لا تحصوها

**(Hadaaad Hatirisiin Dhahdaan Nimcooyin Allah Karimaysaan Inaad Koobtaan )**

Waxaa Ka Mida Nimcooyinka Uu Allah Inagu Manaystay Kuwa Ugu Waawayn Ee Ugu Qalisan Nicamada WAKHTIGA Dhiganahanna Wakhtigaan Kaga Hadli Doona Hadii Allah Uu Ogalaado Waxaana Ugu Magac Daray **MUXUU GALABSADAY WAKHTIGU ?**

Waxaana Raba In Ay Noqoto Taxane Waxaana Ugu Magacdaray

**DA'YARTA & DIINTA**

Marba Mawduuc Ayaanku Soo Qaadan Doona Ishallah Da'yarta Ku Saabsan

Waxayna Ku Socotaa Da'yarta Umadayda

Waxaanan Allah Ka Rajaynayaa Inuu Ku Baraarujiyo Midkastoo Moogan Qiimaha Da'yarta Umadayda Ishallah

**Qiimaha Wakhtiga**

Wakhtigu Waa Cumriga Qofka Waana Nolosha uu Noolyahay Intuu Aduunka Joogo Cidkastoo Caaqil Ah Way Fahmi Kartaa Qiimuhuu Leeyahay Wakhtigu Iyo Inuu Yahay Fursad Uu Allah Ku Manaystay. Wakhtiguna Waa Habeenka Iyo Maalinta Isdaba Wareegayo

Quraanka Markaan Aadno Waxaan Ku Arkaynaa Allah Oo Si Aan caadi Ahayn Inoo Dareensiinaayo Qiimuhuu Leeyahay Wakhtigu

ALLAH subxaanah Quraanka Dhexdiisa Wuxuu Ku Dhaartay Wakhtiyo Badan

Allah Wuxuu ku Dhaartay

Habeenkii

**والليل إذا يغشى**

**Waxaanku Dhaartay Habeenku Markuu Wax Qariyo**

**والنهار إذا تجلى**

**Iyo Maalintu Markay Ifto**

Sidoo Kale Allah Wuxuu ku Dhaartay

Barqada

**وضحى**

**Waxaan ku Dhaartay Barqada**

**والليل إذا سجى**

**Iyo Habeenka Markuu Xasilo (Wixii dhaqdhaqaaqayay Ay Xasilaan)**

Wuxuu kaloo uu Ku Dhaartay Subaxa

**والفجر وليال عشر**

**Waxaanku Dhaartay Subaxa**

**Iyo Habeeni Tobon Ah**

Allah Subxaanah Wuxuu Si Guud Ugu Dhaartay Wakhtiga Wuxuuna Yiri

والعصر

**Waxaanku Dhaartay Casarka**

Halkan Casarka Waxaa Laga Wadaa Wakhtigoo Dhan Siday Mufasiriintu U Badan yihiin Waana Sida Xooga Badan Siduu sheegayo Al Callaamah Ibnu Qayyim Allaha U Naxariiste

Allah Subxaanah Waxaa U Banaan Inuu ku Dhaaran Karo Waxkasti Oo Waxyabuhuu Abuuraya Sida Wakhtiyadan Oo Kale Ama Goobo Sida Makka IWM Laakin Anaka Hadaan Nahay Adoomo Inooma Banaana Inaan Ku Dharano Waxyaaba kale.

Kaliya Waxaa Inoo Banaan Inaanku Dhaarano Allah siduu Nabigu Yiri

**Cidii Dhaaranayso Haku Dhaarato Allah Ama Ha iska Aamusto**

Xadiiskale Nabigu Wuxuu Yiri

**Cidii Cidaan Allaah Ahaynku Dharata Shirkibuu ku Dhacay**

Allah Markuu ku Dhaarto Arin

Culumado waxay dhahaan Wuxuu Inagu Baraarujinayaa Arinkaa Muhiimada Uu Leeyahay Iyo Qiimahuu ku Fadhiyo

Xaqiiqatana Wakhtigu Waa Nolosha.

Noloshuna Waa Maalmo iyo Habeeno isku Tagay Labadanina Waa Daqiiqado isku Taqay Dadka Caqliga Leh Hadareemaan

Waa Inuu Qof waliba Uu Garta In Ay Tahay Waxanuu Nool Yahay In Ay Tahay Noloshii Ugu Dambaysay Waayo Markale Ma jirto Fursadu Waa Mar Kalila

Khaasatan Da'yarta Umadayda Waxaanku Jirnaa Cumriga Halkii U Qaalisanayde Inaan Mooganaan

**Da'yarta Umadaydaay** Dareen U Yeesha Da'daad Jirtaan in Ay Taahay Deeq Rabi Waxaana Ina Saaran Inaan Kaga Faa iidaysano Khayraatka Allahna Ugu Mahadnaqno Dhalinyarnimada

Maxaa yeelay Dadbaan Fursad U Helin Caalamkan Dhalinyarnimada Qaarna Way Heleen Laakin Waxay Dareemeen Qiimaheeda Markay

Dhafeen Ay Soo Hadhaysay Waayeelnimo
Cumar ibnu C/Caziiz Ayaa Yiri
إن الليل والنهار يعملان فيك فعمل فيهما
**(Habeen iyo Dharaartu Adigay Kaa Shaqaynayaane Adiguna Ka Sheqee)**
Haa Waykaa Shaqaynayaan
Cumrigaagii Ayay Soo Gabinayaan
Xoogagi Ayay Daciifinayaan
Dhaliyarnimadii Ayay Waayeelnimo Ku Badalayaan
Adiguna ka Sheqee Habeenka iyo Maalinta

Xasan Al Basri Wuxuu Yiri
**(INA Aadamow Waxaad Tahay Maalmo Markay Tagto Maalin Waxa Tagay Qayb Adiga Kaamida)**

**Da'yarta Umadaydaay** Caqliyo Foorara Haku Eegina Noloshan
Hana Noqonina Kuwo Jahli Kaga Sugan Fursadan Dhalinyarnimo
Loomana Baahna Inaan Hurudno Wakhtigay Umadaha Kali Soo Jeedaan
Mana Aha Inaan Ka Dhuumano Dhibatooyinka Ayku Salaysan tahay Noloshan.
Da'yarnimadana Waa Inaan Ku Samayna Nolol Dhanbiilo Farxada Bixinayso
Dhalinyaranimaduna Waa Qaybta Ugu Muhiimsan Cumrigeena Uguna Qaalisan
Wuxuu Dhahay
Sheikh Salah Mahamed Qaanim
**(Allah Kaga Baqa Noloshiina**
**Allah kaga Baqa Cafimaadkiina**
**Allah Kaga Baqa Maalikiina**
**Allah Kaga Baqa Dhalinyarnimadiina )**
Intaa Ku Eegyahy Hadalki Sheikha
**Da'yarta Umadaydaay**
Mudadan Dhalinyarnimada Aan Fursad U Siino Si Ay Nolosheena Wax Uga Badasho Iyo Fikirada Wanaagsan Ee Ay Xambaarsan Yihiin

Da'yartu Ee ku Haboon In Umadan Loogu Adeego

Laakin Sura Galmaha in Aan Si Fiican Ugu Fikirno Illaa Anakoo Aqoon Ku Dhisno Mooye Aqoontuna Suura Gal maha Illaa Aan Wakhti Siino Maahine

Allah Subxaanah Markuu Ka Warmaaayay Galadu Markay Galaan Naarta Jahannaba

Wuxuu Tilmaamay In Ay Dalbanayaan Ina Laga soo Saaro Allah Wuxuu Ugu Jawacaabay In Cumri Lasiiyay Ku Filnaa Oo Ay Waantoobi kareen

Wuxuu ku Dhahay Allah

**أولم نعمركم ما يتذكر فيه من تذكر وجاءكم النذير**

**(Miyaanan Ini Cumrisiin Cumri Ay Ku Waantawdo Cidii Waantoobaysaa )**

Allah Wuxu Xujjo Kaga Dhigay Inuu Cumri Siiyaya Wuxuuna Tilmaamay In Cumrigu Yahay Meesha Allah Lagu Rumeeyo Sidoo Kale Inuu Yahay Meesha Cidii Rabta In Ay Waantawdo Loo Baahan Yahay In Ayku Waantawdo

Galadan Waxa La siiyay Cumri Iyo nolol Ay Allah ku Rumayn Kareen Oo Ay Noloshooda waxkaga Badali Kareen Laakiin Markay Aakhiro Tageen Miyaa Waa Maray Fursadaasi Farahooga Ka Dhaqaajisay

Waxaanan Ka Qadanaynaa Ayada In Cumrigoo Dheeraado Ay ku Tahay Xujjo Qofka Banii'aadamkaa

Xaafidkii Waynaa Ee Ibnu Kathiir Markuu Fasiraayo Aayadan Wuxuu Sheegaya Hadal Uu Yiri Qataadah Oo Ah

**(Waxaad Ogaatiin Cumrigoo DHeerado Inuu Yahay Xujjo )**

Nabiguna عليه الصلاة والسلام

Waxuu Inoo Sheegay In Cida Cumrigiisu Gaadho 60 Sanadood inuu Allah U cudurdaar Dhameeyay wuxu Yiri

**(Cida Uu Allah Cumri 60 Sanadooda Siiyo Uu U Cudaaar Dhameeyay Cumri Ahaan )**

Macnaha Cidii Gaadha Cumriga 60 Sanadadood Mahelaayo Wuxuu ku Cudurdaarto Marka Allah Uu Hor Imido Maxaa Yeelay Waxaa Lasiiyay Mudo Uu Dambigiisi Kaga soo Laami karo Uu Ku Waantoobi karo Uu

Camal Wanagsan Oo Shirki Bidco Iyo Khuraafaat Ka Madhan Uu Samayn Karo

Quraanka Markaan Eegno Allah Wuxu Ka Waramay inuu Habeenka iyo Dharaarta Uu Allah Inoo Sahlay Allah Wuxuu Dhahay

**وسخر لكم اليل والنهار**

**(Allah Wuxuu Iniii Sahlay Habeenka Iyo Maalinta)**

Si Aan Uga Faa'iidaysano Labadan Oo ah Cumrigeena

**Da'yarta Umadaydaay**

Cumrigu Waa Nolosheena

Noloshuna Waa Daqiiqado

Daqiiqaduhuna Waa Ilbidhiqsiyo

Sheikh Barbaraawi Ayaa Yiri

**Adoomadii Ilahayow Cumrigu Uu Gaaban yahay Inta Ka Hadhayna Way Yartahay**

Wuxuu kaluu Yiri

**Daqiiqad Kastoo Ka Mida Cumrigaaga**

**Waxayka Qalisan tahay Wax Kastoo Qaaliya**

**Waxay ka Qaalisan Tahay Dahabka Iyo Lacagta Lu'lu'a Iyo Dheemanta**

## NATIIJADA WAKHTIGAAGA DHABARKA U RIDO

Hadii Uu Qofku Ka Faaiidaysto Cumrigiisa Iyo Hadii Kalaba Natiijada Wixii Ka soo Baxo Qofka Umbay U Sugaysaa

Allah Subxaanah Wuxu ku Odhanayaa

Dadka Janada Gala

**كلوا واشربوا هنيئا بما أسلفتم فى الأيام الخالية**

**(Cuna Oo Caba Cunno iyo Cabitaan Bogaadin Leh Waxaad Soo Hormarsateen Maaalmihii Tagay)**

Mar kale   Wuxuu Yiri Allah

ءاخذين ما ءاتاهم ربهم

**Waxay Qaadanayaan Wuxuu Siiyay Rabigood**

Laakiin Maxay Tahay  Sababtay U Qaadanayaan Waxyaabahan Uu Rabi Siiyay

Sababtaa Ah  Sidan

إنهم كانوا قبل ذالك محسنين

**(Iyagu  Waxay Ahaayeen  Arinkan  Ka Hor** (Macnaha intay  Noloshii Aduun Joogeen)

**Kuwo  Sama Falayaala  Oo Camalkooda Wanaajiyo)**

Galadana Allah Markuu Ka Waramaayay In Ay Allah Wax lawadaajiyeeen Cibaadadiisi   Oo  Ay Lumeen Aduunkii

Markay Aakhiro Tagaan Waxaa Lagu Odhani

ذالكم بما كنتم تفرحون  فى الأرض بغير الحق وبما كنتم تمرحون

**Arinkaa** (macnaha Halawgaa Aad Halawdeen)

**Waa Shay Sababtii Aad Ahaydeen Kuwo Ku Farxa  Dhulka Xaqdaro  Iyo Qooqiini Sababtii**

Allah Wuxuu Ku Abaal Mariyay  Kuwa Janada Galay  Waxay Shaqaysanaayeen Maalmihii Lasoo  Dhaafay  Ee  Cumrigooda Ahaa

Kuwa Naarta Galayna Wuxuu Allah Ku Abaal Mariyay Iyagna  Waxay Soo Samayn Jireen  Maaalmihi Dhulka Ay Joogeen  Ee  Aha Xaqdarada Ay  Dhulka  Dushiisa Ku Faraxsanayeen    Iyo Qooqooga Sababtii

Cumrigaaga Natiijadiisa Inaad Lakulmina  Shiki Male

Sheikh  Raslaan Ayaa Yiri

**(Wax kale  Mahine Waxani Waa Cumrigaagii Wuxuuna Ku Gaadhsiin Laba Natiijo Midkood**

**Ama   Sacaado Ama Halaag Ku Dadaal Wakhtigaaga )**

**Da'yarta Umadaydaay**

Xaqiiqda Ayaa Ah Natiijada Wakhtigaaga Ka soo Baxda Lagugu Abaal Marin

Cumrigaaga Maalmihii tagay Haday Ahaayeen Maalmo Ku Wabariisanayay Kuna Gabagaboobayay Alle Ka baq Iyo Daacad Rabi Bishara Kuu Sugnaatay Ishallah

Haday Ahaayeen Kuwo Sidaa Aan Ahayn Oo Shar iyo Balaayo Ku Bilaamayayna Hada Isgaadh Wakhtigu Uu Socdaaye Rabina Raali Gali Soo Dhawayn Ayaad kala Kulmiye

**Sugo Natiijada Wakhtigaaga Ka Soo Baxdo**

## CADAWGA CUMRIGA

Maadaama Uu Cumrigu Yahay Fursad Iyo Dheeman Aan Caadi Ahayn Waxaa Jira Waxyaabo Cadaw Ku Ah Waxaana Kamida **Dib u dhiga**

Arinkan Dib u dhigu Cadaw Waynbuu Ku Yahay Wakhtigaad Hada Haysatid Ee Aad Wax Ku Qaban Lahayad Wuxuuna U Badala Rajo Iyo Hididiile

Laakin Qofku Markuu Dareensan Yahay Inuu Nool Yahay Noloshiisii Fursad Masiiyo Dib Udhiga Maxaa Yeelay Qofkan Wuxuu Dareemayaa In Ay Nolosha Ay Meel Uga Banaanayn In Uu Fursad U Siiyo Cadawgan

Dib u Dhiga Marka Aad Eegtid Waa Saxiibka Nafta Aadbayna isku Jecel yihiin Ayaad Odhani Markaad Aragtid Siduu Ugu Raaxaynaayo Uu U Dhawraayo

Waana Halka Uu Qofka Ka Soo Galo Marka Hore Laakin Kuumuu Cadaynaayo Inuu Mustaqbalka Uu Burbur ka Yeelaaayo

Wuxuu Kuu Sawiri Mustaqbal Ifayo Badhaadhe Aan Caaadi Ahayn Iyo Nolol Aan Horay Loomaqal Layaabkeeda Iyo Hididiile Dheer Iyo Caalam Ka Duwan Oo ka Wacan Ka Aad Hada Ku Nooshahay

Wuxuuna Gacanta Kuu Galine Hididiile Uun Kaliya

Lahaayso Hididiila Dheerida Waxa Lagu Yaqaana Galada Bal Ina Mari Halka Quraanka

Allah wuxuu Dhahay

ذرهم يأكلوا ويتمتعوا ويلههم الأمل فسوف يعلمون

**Iskaga Tag Hacunaan Oo Haraxaystaan**
**Oo Hadaahiyo Hididiiluhuye Mar Dambay Garan doonaane**
Allah Wuxuu Tilmaamay In Galada Hididiiluhu Uu Dagayo.

Aad Ayay U Muhiim Tahay Inaan Isaga Ilaalino Arinkan **Dib u Dhiga**
Ibnu Cumar Wuxuu Odhan Jiray
**(Markaad Galabaysatid Hasugin Subaxa**
**Markaad Subaxaysatana Hasugin Galabta**
**Caafimaadkagana Ka Sahay Qaado U Oo Sahay Qaado Bugtaantaada**
**Noloshaadana Ka Sahay Qaadoo U Sahay Qaado Dhimashadaada )**

Noloshu Waa Mar.
Mar labaadna Hashiigin
Waana inaan Wakhtigeena Ka Jiranaa Hororada Soo Weerarayaa
**Da'yarta Umadaydaay**
Hadaananka Faa'iidaysanayn Dhalinyarnimada Mawaxaan Sugayna
Markuu Awoodu Dhamato Idhuhu Soo Gaabtaan Talabadu Soo Yarato !!

**Waxaa Ka Mida Cadawyada Wakhtiga** Asxaabta Xun Dadku Waa Labo

- Dad Wanagsan Oo Dad Wanagsan Lasaaxiiba Khayrkana Isla Wado Kalana Faa'iidaysto Oo Daacada Rabi Isku Amra Iskuna Dhiiri Galiyo Iskuna Dareensiiyo Dhimashada Iyo In Qabri Dambeeyo Waana Asxaab Isxasuusiya Allah Lahurtagaayo Qaybta Waa Qaybta Larabo In Lala Saxiibo Mudana In Wakhti Lagu Garab Guto

- Qaybta Labaad Ayaa Ah Asxaab Xun Oo Aan Cilmi Kuu Kordhunayn Faa'iida Aan kula Wadagayn Aakhiro Iyo Allah midtoona Ku Xasuusinay Khayr Aan Kugu Dhiri Galinayn Iska Daa In Ay Qiimaha Wakhtiga Kuu Sheegaane

  Bal Waxayku Faraxsan Yihiin Halistaa
  Ayku Sugun Yihiin Oo Asxaabna Ay Ku
  Yihiin WaxYaabaha Layaabkale Waxaa

Weeyi In Ay Isku Faanayaan Iyagoo
Xaladaa Ku Sugan Waxaanadka Maqli
Iyagoo Is Amaanaayo Oo Leh
Saaxiibkay/day Hebel/Hebla
Wakhtibaan Isla
Qaadana
Waa Sax Way Isla Qaataan Laakiin
Waa Wakhti Intay Isla Qabtaan Ay
Burburiyaan Laguna Dhamaysayto
Macaasi Iyo Cadho Rabi Iyo Xan
Cay Xishood La'aan Isku Dar.
Kuwa sidana Wakhtiga Ayay ku Ciyaraan
Wayna Silciyaane Halaga Ilaalsado
Cumriyada

## DAAWADA DIB U DHIGA

Dawada Ugu Wacan Ayaa Ah
**Garo Qiimaha Wakhtigaaga**
**Adaa Ilaaalsan Doone**

## KA FAA'IIDAYSO SHAN SHANKA HOR

Nabigu عليه الصلاة والسلام Oo Aha Mid Allah U Soo Diray Inuu Khayr Wallba Inoo Tilmaamo Ahaana Mid Dhalinyarada Isgarab Taago Mar Wali Ayaa Wuxuu U Dardaarmay Khayraat Dhamaantii Waxaana Ka Mid Aha Dardaaranadiisi Qalbigu Kudagaayay Inuu Yiri

اغتنم خمسا قبل خمس

1 شبابك قبل هرمك

2 وصحتك قبل سقمك

3 وغناك قبل فقرك

4 وفراغك قبل شغلك

5 وحياتك قبل موتك

Nabigu Wuxuu Bixinaya Dardaaran Dani Inoogu Jirto Hadaan Qadanana Badbaadada Aanku Guulaysanayno

Kaalaya Aaan Dardaaranka U Fiirsanee

Wuxuu Yiri Ka Faa'dayso Shan Shan Ka Hor

**1 dhalinyarnimadada Gabawgaga ka Hor**

Nabigu Wuxuu Da'yarta U Tilmaamayaa In Ay Ka Faa'iidaystaan Intay Da'yar yihiin Maxaa Yeelay Wuxuu Inuuga Digayaa In Aan Dayacno Shabaabnimadeena

Maxay Tahay Sababta Uu Nabigu U Leeyahay Dhalinyarnimada Ka Faa'iidayso

Sababta Ayaa Ah Ina Qofku Haduu Dhaafo Marxaladan Qaligaa Uu Dhinac Kastiba Iska Dhimaayo

Oo Qofku Markuu Waynaado Waxaa Lamoodaa Inuu Caruurnimadii Ku Soo Laamay

Bal Ila Fiiri Siduu Ugu Soolaamayo Caruurnimadii

1. Ilmuhu Uu Yaryahay
   Waayeelkuna Uu Soo Yaradaa Oo Haduu
   Dheeraa Uu Soo Gaabtaa
2 Ilmaha Malaha Caqli ku Filan
   Waayeelkana Malaha Caqli ku Filan
   Oo Uu isku Dhaxdaata
   Arimahana Iyo Maamulka
   Lagalama Tashado Oo uu

Asaasaqaa
3 Ilmaha Male Xoog Sida u Adag
Waayeelkuna Sido Kale Oo Waka Ladhaho
Hebel Uu Waynaadoo Uu Hawl Gabay
4 Ilmuhu Malaha Markuu Yaryay Ilko
Dhamaystiran
Waayeelkuna Wayka Daataan Ilkuhu
5 Ilmaha Cunto Badan Ma Cuno Inta Badan
Waayeelkuna Waa Sidoo Kale
6 Ilmuhu Dhareerka Iyo Duufka Ayaa Laga
Masaxa
Waayeelkana Sidoo Kale
7 Ilmaha Yar Saxarada Ayaa Laga Qaada
Waayeelkana Sidoo Kale
8 Ilmaha Yar Inta hore Caadi Uma Socdo
Illaa Isagoo Gidaarka Tiirsan Mooye
Waayeelkuna Isagoo Ul Wato Mooye
Masocdo
9 Ilmaha Dhabtaa Lasaaraa Oo Lagu Haya
Waayeelkana Waa Sidoo Kale
10 Ilmuhu Wuxuu Jecel yahay In Loo
Sheekeeyo
Waayeelkuna Sidoo Kale
11 Ilmaha Looma Diro Hawlo Waa Wayn
Waayeelkana Sido Kale
12 Ilmaha Lagama Garabtago Inta Badan
Waayeelkana Sidoo Kale

Nabigu Wuxuu Ka Digayaa Ah Waxyaabahan Iyo Waxyaaba Kaloo Waaayeeladu Dareemayaan
Wuxuuna Nagula Talinayaa Inaan Ka Faa'iidaysano Dhalinyarnimada Iyo Xooga Uu Allah Inagu Manaystay

**2. Cafimaadkaga Buktaantada Ka Hor**

Arinta Kale Uu Nabigu Inagu Baraarujinaayo Ayaa Ah Inta Caafimaad Qofku Hayo Inuu Ka Faa'iidaysto

Waxaaa Laga Yaaba Ina Qofka Uu Ku Soo Boodo Xanuun Uu Ladhaco Ka Dibna Uu Sababo In Uu Sidaa Qofku Ku Geeryoodo

Intan Danbana Cuduro Halisa Ayaa Isku Soo Taraayo Qofka Muslimkaa Waxaa Saaran Inuu ka Faa'iidaysto Caafimaadka

Nabigu Wuxuu Dhahay

**نعمتان مغبون فيهما كثير من الناس الصحة والفراغ**

**(Laba Nimcadood Way Moogan yihiin In badan oo Dadka Ka Mid Ah Cafimaadka Iyo Firaaqada)**

In badan Haday Ka Moogan Yihiin Waxaa Iska Yar Inta Ka Faa'iidaysanayso

Allah Hanaga Yeelo Kuwa Ka Faa'iidaysto Aamiin

**3. Hodantinimadada Intaad Faqiiroobin**

Halkana Wuxuu Nabigu Inagu Dhiiri Galinayaa Inaan Qaninimadeena Ka Faa'iidaysano Intuu Imanin Faqri Jilbaha Inoo Joojiyo Oo Dariiqa Ina Fadhiisiyo

Laakiin Qaninimadu Xoolo Inaad leedihid Uun Kaliya Maha

Waxaa Soo Galayso Inaad Aqoon Leedahay

Ood Qani Ku Tihid

Waxaa Kaloo Soo Galayso Inaad Xoog Leedahay Waana Inaadka Faa'iidaysatid Xoogaaga Daciifnimo Intay Ku Haleelin

**4. Firaqadaada Intaad Mashquulin Ka Hor**

Marka Hore Allah Wuxuuu Qofka Ugu Nicmeeyay Nicmada Wakhtiga Ama Cumriga Waxaa Kaloo Jira Nicmooyinku Sii Jira Oo Ah Waxkhtiyada Firaaqada Ah.

Oo Ah Nicmad kale Nabigu عليه الصلاة والسلام Wuxu Yiri Isagoo ka Waramaayo

**Ka faa'iidayso Firaqadaada Mashquulkaga Ka Hor**

Markuu Qofku Firaqada Yahay Ayuu Wax Si Wacan U Qabsan Karaa Laakiin Hadii Uu Mashquulo Si Fiican Wax Uma Qaban Karo.

Intay Hawluhu Isku Soo Cidhiidhin Kala Qabo Ayuu Daran Yahay Hadalka Nabigu

Ogowna Ma jiro Wakhti Aaan Waxba Laqaban Wakhti Kasti Wuxu Leeyahay Wax Buuxiya Waxaasi Hanoqdo Wax Muhiima Ama Waxaan muhiim Ahayne

Laakin Waxaad Xasuusnaata Inuu Wakhtigu Amaano Kugu Yahay Oo Lagu Waydiin Doono Waxaadku Bixisay Iyo Maxaadku Gaboojisay Cumrigaaga

**5. Noloshaada Ka Hor Intaad Dhiman**

Nolosha Oonka Faa'iidaysano Oon Khayraat iyo Tawxiid Allah ku Camirna Waxaa Ku Jirta Guusheena Aduunka iyo Taakhiraba. Noloshuna Waa Wakhtigaa Aan Hada Noolnahay

Waana Inaan Xaqiiqsanaana In Wakhtigu Yahay Hantida Ugu Wayn Een Haysano Inuu Yahay

Waxaa Layidhi Waxaa Jiray Nin iibin jiray Barafka Markii Cedceedu Ay kululaatay Ayuu Barafki Bilaabay Inuu Biyoobo Ka Dib Ninkii Ayaa Bilaabay Inuu U Lilmeeyo Ooyo Barafkiisa

Markaas Ayuu Gudogalay Inuu Dadki U Dhawaaqo Oo Uu Dhaho Aaaryaa U Gargaari Cid Uu Ka Dayacmaayo Wixii Igu Mudnaa Hantidisa

Hadii Ninkan Uu Yahay Hantidiisa Ugu Qaalisan Baraf

Hantida Ugu Mudan Een Leeyahay Adna Leedahay Ayaa Ah Wakhtiga

Hadii Uu Kani U Ooyaayo Baraf Cumrigana Maxaad U Malayn ?

**<u>Ka Jawabida Su'aalaha</u>**

Waxaan Isku Dayaynaa Inaanka Jawabno Dhawr Su'aalood Anakoo Allah U Kaashanayno

**Su'aal**
**Halkeenka Marnaa Noloshan ?**

**J.** Majirto Meel Kaloo Lamara Oon Ahayn
Noloshan Intaan Allah U Kaashano
Ayaan Iyada Dhex maraynaa Waayo
Waa Nolosheenii

**Su'aal**
**Waa Maxay Noloshani ?**

**J.** Waa Wuxuu Allah Abuuray !!

**Su'aal**
**Maxaanku Dilnaa Wakhtiga ?**

**J.** Walalayaalaw Xaqiiqatan Waxa Ah Waxa
Lalayaabo Kuwa Odhanaayo Ee Is
Waydiinaayo Su aashan Laakiin
Walalayaalow Goormuu
wakhtigu Cadaw Noqday ?
Goormuu Noqday Mid Anaka
Dhibato Inoo Gaysanaayo ?
ii Jawaaba Walalayaalow
**MUXUU GALABSADAY WAKHTIGU ? !!**
Maxay Tahay Caga Joglaynta Intaa Le eg

**(Dad bay Cumriyadoodii Culays Ku Noqdeen )**
**(Sh Raslaan)**

Nicmadii Ayay U Arkeen Ciqaab iyo
Cadaab Holcaaya
Layaab badanaa Dadkaasi

Sheikh Raslaan Ayaa Dhahay Kalmad
Layaab leh Wuxu Yiri
**(Markaad haysid Wakhti Aad
Garan laadahay Waxaadku Qabatid
ANIGAA Kaa IIBSANI)**

Asxaabigii Waynaa Ee Cabdillahi Ibnu
Mascuud Ayaa Yiri
**(Ugamaan murugoon Wax Sidaan uga
Murugooday Maalin Cedceedu Dhacday
Uu Cumrigaygii Naaqusmay
Camalkaygiina Uu Siyaadin )**

**Su'aal**
**Noloshan Waa Dhibaate ee ?**

**J.** Haa Waa Runtaa Lakiin Maan isku
Dhiibna Nolosha Sidaaya ? !!
Waa maya
Waxaa Nasaaran Ayaa Ah Inaan Allah
Kaashano Ka Dibna Nolosha Ka
Faa'iidaysano

## <u>SALAFKU SIDAY KU AHAAYEEN WAKAHTIGA ?</u>

Salafku Waa Nabiga Calayhi SalaaTu Wasalaam Iyo Asxaabta iyo Tabiciintoo Ahaa Ardaydii Asxaabada Ayna Tahay Inaan Wax Kastoo Noloshan Ah U Daba Fadhiisano Maadama Uu Allah Amaanay.
Markaan Eegno Siday Wakhtiga Ula Dhaqmayeena Waad Yaabi Xaqiiqatan
Bal Ina Mari Aan Wax Ka Mida Aragno Siday Wakhtiga Ku Ahaayeene

Wuxuu Yiri Cabdillahi ibnu Mascuud RC

**(Ugamaan Murugoon Wax Sidaan Uga Murugooday Maalin Cedceedu Ay Dhacday Cumrigaygiina Uu Yaraday Camalkayguna Uuna Siyaadin )**

Wuxuu Yiri Cumar ibnu Cabdul Caziiz

**(Habeenka Iyo Dharaartu Way Kaa Shaqaynayaane Adna Ka Shaqee )**

Runtiina Waa sidaa Oo Waykaa Shaqaynayaan Qabrigay Kuu Dhawaynayaan Timahagii Madoobaa Ayay Ciro U sababayaan Dhabarkaagii Ayay Soo Godayaan Dhagihii Ayaa Ku Cuslaanayo Aragii Ayaa Ku Soo Gaabanaayo

Ka Shaqeee Adna

Wuxuu Yiri Xasan Al Basriy

**(Ina Aadamaw Waxaad Tahay Maalmo Markay Tagto Maalini Waxaa Tagay Qayb kaa Midaa )**

Markale Wuxuu Yiri

**(Waxaan Soo Gaadhay Dad Wakhtiyadooda Siday Ugu Dadaali Jereen Ka Adag tahay Aniku Sidaad Lacagtiina Ugu Dadaalaysiin)**

Waxaa layaableh Imaamkii Waynaa Ee

Caliy ibnu Caqiil Alxanbaliy Ee Lahaa Kitaabka Aduunka Ugu Wayn

Sheikhul Islaam Oo ka Waramaayo Imaamkan Ayaa Yiri

**Wuxuu ku Jiraa kuwa Caalamka ugu Caqliga badan Wuxuuna Ahaa Mid Siduu U Ilaalinaayo Wakhtiga Ay Layaaan leedahay**

Wuxuuna Sheegay inuu ka Midha Dhaliyay Oo Uu Qoray Kitaabkii Ugu Waynaa Ee Uu Caalim Qoro Oo layidhaahdo

**(KITAABU ALFUNUUN)**

Kitaabkan Imaamu Dahabi Markuu Ka Waraamaaayay Wuxu Yiri

**(Lama Qorin Kitaabkan Kitaabka Wayn Aduunkaba )**

Su aasha Ayaa Ah Siday Caliy Ibnu Caqiil Ugu Suura Gashay Inuu Qoro Kitaabkii Dunida Ugu Waynaa Jawaabta Isagaan U Daynaynaa

Wuxuu Yiri Isagoo Iska Hadlaayo

**(Aniga iima Banaana Inaan Sacad Cumrigayga ka Mida Dayaco Haduu Kari Waayo Carabkaygu Waxsheega Ama Inaan Doodo Waxaanka Shaqaysiiya Caqligayga Markaan Jiifo Kamana Kaco Jiifka Illaa Anigay Igu Dhalatay Waxaan Qoro Mooyee...)**

Imaamkii Kalee Xammaad Ibnu Salamah

Markuu Ardaygiisi ka Waramayay Wuxuu Yiri

**(Hadaan Idinku Yiraahdo Maan Arag Xammaad Oo Qoslayo Waa Runtayda)**

Sheikh Raslaan Oo Ka Hadlayaa Dhahay

**(Wuxuu Ahaa Mid Mashquula**

**Inuu Xadiisayo Ama Akhrinaayo Ama Tasbiixsanaayo Ama Tukanaayo Maalintiisana Sida Ayuu U Qaybiyay )**

Oo Wuxuu Yiri Yuunus Al Mu'adib

**(Xammaad Wuxuu Dhintay Isagoo Tukaanaayo)**

Caruurta Muslimiinta Qaar Kamida Ayaa Soo Martay Cabdillahi Ibnu Zubayr Oo Ilmayara Waxay Ku Dheheen Ina Mari Aan Ciyaarnee Wuxuu Ku Yiri

**(Ma Waxa jira Wakhti Laciyaartu leedahay !)**

**Caamir ibnu Cabdil Qays** Oo Ahaa Taabici Ayuu Ninku Yiri Maalin Uu Wadada Maraayay

Waxan Rabaa inaan Kalmad Kuu Sheego

Wuxuu Ugu Jawaabay

**May Kalmad Badhkeedba Ha Ahaate**

Macnaha Kalmad Badhkeedba Ha Ahaatee Ha iwaydiin

Ninkiibaa Yiri Joogso Aan Kula Hadlee

Wuxuu ku Yiri **Jooji Cedceeda.**

**Sheikh Raslaan Ayaa Yiri**

Waayo Haduu Joojiyo  Wakhtigaa Joogsanaayo   Markaasna Cumrigiisi Waxba Ka Dayicmi maaayaan

**Da'yarta Umadaydaay**

**Ma Waxan Sugnaa  Gabaw Xambaarsan Mawjado Hammi  Iyo Calaaacala ?**

## AAN IXTIRAAMNO CUMRIGA
## DHALINYARO

إن أريد إلا الإصلاح مستطعت   وما توفيقي إلا باللّٰه
عليه توكلت  وإليه أنيب

والحمد للّٰه رب العالمين

DHAMMAAD